Puntland State of Somalia

Ministry of Education

Office of the Minister

حكومة ولاية بونت لاند الصومالية

وزارة التربية والتعليم

مكتب الوزير

Sharciga Waxbarshada Gaarka ah ee Dawlad Goboleedka Puntland.

Waxaa Diyaariyey:

Wasaaradda Waxbarshada Dawlad Goboleedka Puntland.

Juune 2006.

Hordhac

Annagoo rumaysan kaalinta ay ka ciyaaraan dugsiyada gaarka ahi dhinaca faafinta aqoonta, gaar ahaan aqoonta ku salaysan dhaqanka soo jireenka ah ee ummada soomaaliyeed sida barashada quraanka, barashada ummuuraha diinta islaamka iyo dhinacyada kale ee aqoonta ee sannadahaan dambe soo korodhay sida barashada luqadaha kala duwan, aqoonta kombiyuutarka, xisaabaadka iwm… ayey waxbarashada gaarka ahi noqotay gaar ahaan xilliyadii ka dambeeyey burburka dawaladdii Somaliya 1991 baal dhalaalaya oo galay taariikhda ummada soomaaliyeed waxay sidoo kale noqotay gundhig ku habboon hor u socodka aqoonta oo waliba sharaf u ah halwadeenada barbaariya ubadkeenna soomaaliyeed.

Haddaba iyadoo aan xurmaynayno kaalinta ay waxbarashada gaarka ahi ciyaarto, sarena u qaadayno maamuuska barbaariyayaasha ka hawlgala iyo annagoo la saanqaadayna siyaasadda dawlad gobeleedka Puntland ee dhanka tacliinta, yoolkeeduna yahay baahinta waxbarashada, kala duwanaanshaha jaadadkeeda iyo kordhinta laamaheeda si loo gaaro waxbarashada lama seegaanka ah (Compulsory) oo tayeysan iyo iyadoo aan ka dhabaynayno dhiirrigelinta waxbarashada gaarka ah, xannaanaynteeda iyo kormeerideeda iyo in lagu gacan siiyo ka dhabaynta yoolasha lagu hormarinayo waajibaadka dugsiyada kaas oo ka dhabaynaya doonitaanka dadweynaha ee waxbarasho casri ah iyo ku dhiirigelinta ganacsatada bixinta dhaqaalaha waxbarashada iyo maalgelinteeda, iyo sugidda dhaqdhaqaaqa waxbarashada, ayaa Golayaasha DGPL ansixiyeen xeerkan ay soo diyaarisay wasaaradda waxbarshada DGPL.

Qodobo Horudhac ah

Magaca Heer hoosaadka iyo bilaabida ku dhaqankiisa

1. Waxaa lagu magacaabaa xeerkan" Heerhoosaadka dugsiyada gaarka ah ee sannadka 2006", wxuuna dhaqan gelayaa markii golayaa sha dawladu ansixiyaan, Madaxweynuhuna Saxiixi, waxaana saxiixaas ku buraya wixii heer hoosaad ah oo ka horreeyey taariikhdaas.

2- Macnaha erayada xeerkan ee hoos ku qoran waxaa loola jeedaa:-

- Dugsiyada gaarka ah: Waxaa loola jeedaa dugsiyada aysan dawladdu wax dhaqaale ah ku bixin dhismahooda, dayactirkooda iyo socodsiintooda intaba. Dugsiyada lagu dhisay deeq dibadeed oo ay gacanta ku hayaan ururo samafal waa hanti umadeed lahaanshahoodu,(Public property) laakiin maamulkooda ayaa loo tixgelinayaa mid gaar ah.
- Wasiirka: Waxaa loola jeedaa wasiirka waxbarashada iyo barbaarinta.
- Wasaarad: Waxaa loola jeedaa wasaarada waxbarashada iyo barbaarinta.
- Awooda Tacliinta: Waxaa loola jeedaa wasiirka waxbarashada iyo barbaarinta ee Puntland.
- Gudiga heer Gobol: Waxaa loola jeeda golaha lagu dhisayo xeerkan.
- Maamulka: Waxaa loola jeedaa maamulka tacliinta gaarka ah ee Puntland.
- Maamulka Dugsiga: Waxaa loola jeedaa maamulaha dugsiga, barayaasha iyo dhamaan adeegyada raacsiisan.

2. Qaybaha waxbarashada gaarka ah: waxbarashada gaarka ahi waxay u qaybsantaa dhowr jaad oo kala ah:
    - Waxbarashada qaabaysan(Formal education) : Waxayna ka koobantaa heerka waxbarashada asaaska ah (primary) iyo waxbarashada dugsiyada sare.
    - Waxbarashada aan qaabaysnayn(Non Formal education): Sida dugsiyada barbaarinta dhallaanka, dugsiyada quraanka, waxbarashada dadka waaweyn, tababarada xirfadaha, dugsiyada farsamada iyo rugaha waxbaridda naafada.

3. Waxaa la dhisayaa gudiyo heer Maamul goboleedka Puntland ee waxbarashada gaarka ah oo uu guddoomiye u yahay wasiirka waxbarashada iyo barbaarinta ee Puntland. Waa inaysan xubnaha golahaasi aysan ka badan 3 xubnood gobol kasta, waana inay ka mid yihiin xubno aqoon gaar ah u leh dhinacyada barbaarinta, wakiillo dugsiyada gaarka ah iyo xubnaha aad u xiiseeya arrimaha waxbarashada. Sidoo Kale Marka sharcigan la ansixiyo Waxaa la dhisayaa isla markaasna la hawl gelinayaa Waaxda Waxbarshada Gaarka ah ee wasaaradda waxbarshada.

4. Awoodda Hubinta,kormeerka iyo dabagalka Wasaaradda.

Wasaaradda Waxbarashadu waxay kormeeraysaa isla markaasna hubin iyo Dabagal Ku samaynaysaa dhammaan goobaha waxbarshada guud ahaan iyo kuwa khaaska gaar ahaan isla markaasna qaadaysaa talaabooyin lagu joojinayo sii socoshada goobahaas waxbarasho haddii wasaaraddu u aragto inay ka hor imaanayaan habsami u socodka waxbarashada DGPL.

5. Abuurista Dugsiyada Gaarka ah.

- Qof iyo urur midna ma abuuri karo Goob waxbarasho oo cusub, sidoo kale ma balaarin karo mana fidin karo goob waxbarasho oo horay u dhisnayd Haddii aan ogolaansho qoraal ah laga helin Guddiga Waxbarshada Gaarka ah ee heer Gobol.
- Guddiga heer Gobol Waxay ogolaansho ku meel gaar ah siin karaan oo keliya Dugsiyada assaasiga ah (Basic education).
- Dugsiyadii la abuuray ka hor intaan sharcigani soo bixin waa inay Wasaaradda iska diiwaan geliyaan muddo bil Gudaheed ah ka dib markii sharcigan la waafajiyo.
- Ciddii ka dhega adaygta fulinta qodobka kor ku xusan waxay mutaysanaysaa ciqaabta iyo ganaaxa qodobka 8aad ee xeerakani qeexayo.

5.1 Wasaaraddu waxay amraysaa in la xiro goobtii waxbarasho oo ku sifowda arrimaha soo socda:-

- Mulkiilaha ama maamulaha iskuulku uusan Soomaali ahayn.
- Mulkiilaha ama maamuluhu uusan ku haboonayn Masuuliyaddaas.
- Goobta, Dhismaha iyo qalabka iskuulka uusan waafaqsanayn ujeeddooyinka Guud ee Waxbarashada Puntland.
- Macalimiinta iskuulkaas aysan lahayn khibradda iyo aqoonta looga baahan yahay waxbarashada iyo habka waxbarida.
- Manhajka laga dhigayo uusan ku habboonayn carruurta.
- Haddii maamulaha ama Mulkiiluhu ka dhega adaygo inuu fuliyo awaamiirta Wasaaradda.

6- Diiwaan Gelinta Dugsiyada Gaarka ah.

- Goob kasta oo waxbarsho waa in wasaaradda laga diiwaan geliyaa ogolaanshaha ka dib. Diiwaan gelintaas waa inuu Mulkiiluhu qoraal ahaan ku soo codsadaa.
- Habka iyo qaabka diiwaan gelinta waxaa qeexaya xeer Wasaaradeed.

7- Khidmadda Diiwaan gelinta.

- Mulkiilaha abuuraya Dugsi hoose/dhexe wuxuu bixinayaa khidmad dhan 10,000.000 Sh,so, khidmadaas waxaa lagu shubayaa Khasnadda Dawladda.
- Mulkiilaha abuuraya Dugsi Sare wuxuu bixinayaa khidmad dhan 30,000,000 Sh.So, khidmadaas waxaa lagu shubayaa khasnadda Dawladda.
- Mulkiilaha abuuraya Jaamacad wuxuu bixinayaa 100,000,000 SH,so Khidmadaas Waxaa lagu shubayaa khasnadda Dawladda.
- Wasaaradda Waxbarashadu waxay bixinaysaa ruqsada diiwaan gelinta markay Hubiso in Khidmaddaas lagu shubay Khasnadda Dawladda isla markaasna ay soo gaarto warqadda lacag bixinta.(general receipt).

8- Ganaaxa iyo ciqaabaha .

- Qofkii abuura goob waxbarasho isagoo aan ogolaansho ka helin wasaaradda isla markaasna ka diiwaan gelin waa dambiile gabood falay wuxuuna Mutaysanayaa Ganaax lacageed oo aan ka yarayn 20,000,000(Labaatan milyan) oo sh,so. Iyo ugu yaraan hal sano oo xarig ah.

9-Waajibaadka iyo awoodaha Waaxda Waxbarashada Gaarka ah:

- Ogolaanshaha labaad ee dhisida iyo furida Dugsiyada Gaarka ah , Ogolaanshaha kowaad waxaa soo gudbinaya gudiga heer Gobol.

- Hubinta manhajka lagu dhigayo dugsigaas inay yihiin manaahij waafaqsan dhaqanka, diinta islaamka iyo asluubta ummadeena.
- Hubinta in siyaasada waxbarasho ee lagu hagayo dusigaas uusan lid ku ahayn kana hor imaanayn siyaasada waxbarsho ee DGPL.
- Ansixinta docoumentiyada kala duwan iyo dabagalkooda.
- Kormeerka dugsiyada ee dhinaca fulinta farriimaha maamulka wasaaradda.
- Ansaxinta hanaanka ay ku dhaqmayaan dugsiyada gaarka ah iyo ku ilaalinta fulintiisa.
- Soo gudbinta warbixinada iyo talo bixinta qaabka shaqada dugsiyada iyo talaabo ka qaadista dugsiyada aan u hoggaansamin sharciga dugsiyada gaarka ah..
- Kormeerka dhinaca barbaarinta ee dugsiyada gaarka ah.
- Go'aan ka gaaridda wax alla iyo wixii khilaafa ee ka aloosma dugsiyada gaarka ah dhexdooda oo ay soo gudbiyaan gudiyada heer gobol.
- Waxaa xafiiskani fulinayaa dabagalna ku samaynayaa wax alla iyo wixii go'aano ee ka soo baxa golaha sare ee waxbarashada gaarka ah iyo siyaasadihiisa ku aadan waxbarashada kuna aadan dugsiyada gaarka ah.
- Gacan ku haynta waraaqaha iyo dokumentiga la xiriira dugsiyada gaarka ah iyo kuwa la xiriira go'aamada golaha sare ee waxbarashada Gaarka ah.
- Qabashada hawlaha xoghaynta ee golaha sare waxbarshada gaarka ah.
- Ka soo talo bixinta ogolaanshaha dhul la siinayo dugsiyada gaarka ah iyagoo la soo xiriiriya dhinacyada qaabilsan.

10- Awoodaha gudiyada heer gobol ee waxbarashada Gaarka ah:

- Guddiyada heer gobol waxay ogolaansho ku meel gaar ah siin karaan Dugsiyada hoose/Dhexe oo keliya, Ogolaanshaha Dugsiyada sare iyo jaamacdaha waxaa bixinaya Wasaaradda oo Keliya.
- Ogglaanshaha ugu horeeya ee dhisidda dugsiyada gaarka ah iyadoo la raacayo qorshayaasha jaangoynta ee wasaaradda.
- Oggolaansha lacagta gibirka(feega) waxbaridda iyadoo lala tashanayo dugsiga, lana tixgelinayo qalabkiisa, adeegyadiisa kala duwan iyo dhulka uu ku fadhiyo.
- Dejinta qorshayaal lagu tababarayo barayaasha kala duwan.
- Kormeerka dugsiyada iyo hagidda dhinacyada farsamada iyagoo la kaashanaya xafiisyada ay khusayso.
- Helidda warbixinada kala duwan ee dugsiyada.

- Dhaqangelinta ganaaxyada la mutaystay oo ay horay u soo gudbisey waaaxda dugsiyada gaarka.
- Xalinta khilaafaadka ka aloosma dugsiyada iyo go'aan ka gaaristooda.

11- Golaha Sare ee heer DGPL ee waxbarashada Gaarka ah:

- Waxaa la dhisayaa Golaha sare ee wabarshada Gaarka ah DGPL Goluhu oo uu guddoomiye u yahay Wasiirka waxbarshadu. goluhu wuxuu yeelanayaa kalfadhiyayaal kala duwan iyadoo goorta iyo meesha lagu shirayona uu goynayo oo keliya wasiirka waxbarashadu. Waxaa kale oo lagama maarmaan ah in la qabto kalfadhi haddii ay soo gudbiyaan codsiyo qoraal 2/3 ee xubnaha goluhu ka kooban yahay..
- Gobol kasta waxaa laga soo magacaabayaa Sadex xubnood oo ka tirsan Gidiyada heer gobol oo kala ah wakiil ka socda Dugsiyada gaarka ah , Guddoomiyaha waxbarashada Gobolkaas iyo hal qof oo dadka waxbarshada daneeya ah aqoon fiican iyo khibradna u leh waxbarshada.(educationist).
- Shirka goluhu wuxuu ansaxayaa haddii goobta yimaadaan kala bar xubnaha in ka badan.
- Go'aanadu waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri, haddii ay codadku is le'ekaadaan waxaa loo badinayaa meesha uu guddoomiyuhu raaco.
- Waxaa u banaan goluhu inuu ugu yeero dad kale inay ka qayb qaataan shirka laakiin iyagoo aan lahayn awoodda codaynta.
- Waxaa u banaan goluhu inuu soo saaro xeer hoosaadyo tilmaamaya habsami u socodka kalfadhiyadooda.

12 .Shuruudaha laga rabo qofka yagleelaya dugsi gaar ah:

- Waa inuu yahay soomali, taariikh nololeedkiisu wanaagsan yahay, karti iyo aqoona u leh hawsha uu bilaabayo.
- Inaysan jirin xukun hore oo lagu riday dibad iyo gudaba, kaasoo taabanaya sharaftiisa, asluubtiisa iyo ammaanadiisaba.
- Inuu yahay qof ka bixi Kara bixinta kharashaadka maaliyadeed ee uu ansixiyo golaha sare ee waxbarashada.
- Waxaa u bannaan golaha sare inuu u ansixiyo urur kasta oo Somali leedahay, amaba mid qalaad oo laga baaraan degey arrimihiisa inay yagleelaan dugsiyo gaar ah iyadoo la raacayo hannaanka u yaal

siyaasada waxbarashada DGPL, oo ay horay ugu oggolaadeen golayaasha DGPL.

13- Habka ama dariiqada loo marayo ogolaanshaha dugsi gaar ah:-

.Waxuu marayaa hannaanka oggolaansha dugsiyada gaarka ah maraxalado kala duwan oo kala horeeya oo ah:-
oggolaanshaha u horreeya, oggolaansha qabashada ardayda iyo oggolaansha u dambeeya.

13.1 Oggolaanshaha u horreeya: waxaa lagu xirayaa loona baahan yahay:-

- Keenidda caddaymaha dhismaha dugisga gaarka ah iyo hannaankiisa ujeedooyinka dugsiga iyo arrimaha la xiriira.
- Manhajka lagu dhigayo iskuulka iyo hadafka loo asaasayo.
- Taariikh nololeedka yagleelaha dugisga gaarka ah iyadoo la raacayo qaab tilmaameedka golaha sare ee waxbarashada gaar ka ah.
- Warqad caddaynta dambi la'aanta.
- Warqadda caddaynta awooda maaliyadda.
- Warqadda oggolaansha awoodaha maamulka, caafimaadka iyo nabadsugidda.
- Marka la helo arrimahaas kor ku xusan, lacagta gibirkana(feega) la bixiyo ayaa waxaa la siinayaa dugisga ogolaansho hore oo gaarsiisan muddo labo sano ah.
- Ogolaanshahaas waxaa soo jeedinaya gudiyada heer Gobol waxaana ugu damaynta ansixinaya wasiirka waxbarshada.

13.2 Oggolaansha labaad qoridda iyo bilaabidda waxbaridda:

Waxaa lagu xirayaa oggolaansha qoridda iyo waxbaridda walxahaan soo socda:

- Helitaanka oggolaansha ugu horeeya.
- Dhammaystirka dhammaan qalabka iyo agabka waxbaridda barbaarinta.
- Helidda warqad ka soo baxday dhinaca maamulka wasaaradda oo ay ku caddeynayaan ogolaanshohooda furida dugsiga gaarka ah markii la waafajiyo arrimaha qodobka 13.1 ee sharcigani tilmaamayo.

13.3 Oggolaansha sadexaad oo u dambeeya:

Waxaa lagu bixinayaa oggolaanshaha u dambeeya iyadoo la raacayo xakameeyayaasha soo socda:

- Inuu dhammaystiro dhismaha dugisiga gaarka ah ugu badnaan muddu Shan sano gudohood ah sida ku cad warqadda oggolaansha hore ee furitaanka.
- In la soo qiimeeyo dhinaca hawlqabadka dugisga muddadii uu shaqada hayey.
- Ogolaanshahan waxaa bixinaya awoodiisana leh gudiga sare ee Waxbarshada Gaarka ee heer Puntland. Waxaana ansixinaya wasiirka waxbarashada.

14- Hab-Tusmeedka waxbaridda, labiska dugsiyada gaarka ah iyo qaabka qiimaynta.

14.1 Hab-Tusmeedka waxbaridda.

- Waxaa dugsi walba lama huraan ku ah inuu adeegsado hab-tusmeedka waxbaridda ee ay dejisey xaruta dhexe ee horumarinta hab-tusmeedyada waxbarashada iyo cilmi barista ama barnaamij walba oo ay soo jeediso wasaaradda waxbarashadu.
- Waxaa u banaan dugsi walba inuu dhigo maaddooyin dheeraad ah haddii ay oggolaansho ka helaan wasaaradda waxbarshada.
- Waa inay dhowraan hanaanka da' raaca ee ay ku salaysan tahay heerarka waxbarashadu si loo dhaqan geliyo habtusmeedka waxbarashada.

14.2 : Qiimaynta iyo Dharka.

1. Wuxuu dhowrayaa dugsi walba qiimayn dugsiyeedka ay wasaaradu soo oggolaatay.
2. Waxuu dhowrayaa maamulka dugsiga gaarka ah dharka ay soo qoondayso Gudiga sare ee Waxbarshada Gaarka DGPL.
3. Waa inuu yeeshaa dugsi walba oo gaar ahi dhar gaar oo ay ardadiisu ka siman yihiin, dharkaasoo ay Go'aaminayaan Gudiga sare ee Waxbarashada Gaarka ah.

15- Maamulka iyo Barayaasha.

15.1: Maamulka dugsiga gaarka ah waxaa lagu xirayaa maamulaha:-

- Inuu yahay Somaali.
- Inuu leeyahay tababar dhinaca barbaarinta.
- Inaysan ka yarayn waayo aragnimadiisu muddo 10 sano ee arrimaha waxbarashada iyo barbaarinta.
- Inuu yahay qof u lug banaan hawsha dugsiga.
- Waa inay Wasaaraddu ogolaataa ka dib marka qiimayn lagu sameeyo aqoontiisa, shahaadooyinkiisa, dhaqankiisa.1WM.

15.2: Barayaasha.

Waxaa lagu xirayaa barayaasha arrimahan soo socda:

- Waa inuu yahay qof ka soo bixi kara arrima barbaarinta la xiriira ee ay soo qoondayso wasaaraddu.
- Waa inay da'diisu u dhexayso 20-60 sano, waxaana u banaan golaha sare ee waxbarashada inay iska dhaafaan shardigaas haddii ay jiraan arrimo lama huraan ka dhigaya.
- Waa inuu haystaa shahaada u qalanta booska uu qabanayo iyadoo la eegayo jaadka shaqada iyo waxbaridda, waxaana arrimahaas qoondeynaya golaha sare ee waxbarasha gaarka ah.
- Waa in uu caafimaad ahaan wanaagsan yahay.
- Waa inaysan ka yaraan barayaasha u lug baxsan oo joogtada u ah shaqada dugsiga sare ee gaarka ah 50% tirada macalimiinta Dugsigaas, halka dugsiga gundhigga (asaasiga) laga rabo ugu yaraan 75%.
- Waxaa lagu qaabaynayaa xiriirka u dhexeeya baraha iyo dugsiga heshiisyo qoraal ah oo ka dhexeeya labadooda laguna kaydiyo nuqul ka mid qaybta Wasaaradda.
- Waxaa lagu magacaabaya barayaasha dugisga walba oo gaar ah marka Mulkiilaha iskuulka, guddoomiyaha guddiga waalidiinta isla ogolaadaan isla markaasna ay ansixiso Wasaaraddu.
- Waxaa lagu caddaynaya waajibaadka barayaasha iyo toobiyaha shaqada barbaarinta hannaan uu soo saarayo golaha sare ee waxbarashada gaarka ah..

15.3.Shahaadada Waayo Aragnimada.

- Waxaa qaybta maamulku siinaysaa warqadda waayo aragnimada 2 sano ka dib barayaasha magacyadoodu ku soo baxaan diiwaanada yaal qaybta maamulku oo ay ansixisay wasaaraddu.
- Waxaa maamulka dugsi walba laga rabaa inay usoo gudbiyaan warbixinada dugsiga wasaaradda waxbarashada iyo Galaha sare ee waxbarshada gaarka ah dhamaadka sannad dugsiyeed walba iyo markasta oo looga baahdoba, waana in warbixinadaas laga helo:-

- Qaabka hawlgalka dugisga gaarka ahi u socdey muddadaas.
- Tiro koobta ardayda fasal walba, tirada barayaasha joogtada ah iyo kuwa shaqada dhiman(part time) ee ka hawlagala dugisga iyadoo la raacayo shaxaha loogu talogalay.
- Go'aanada kama dambayska ee ka soo baxa imtixaanaadka fasal walba.
- hantida dhabta ah ee dhismayaasha iyo qalabka dugsi walba.
- Kutubta iyo tiradooda.
- Barayaasha iyo tababaradooda.

16.Oggolaansha Ardayda iyo Qoristooda.

Ma banana in loo oggolaado arday dugsiyada gaarka ah , iyagoo aan buuxin arrimahaan soo socda:

- Inuu ardayga uu la yimaado dhammaan shuruudaha looga baahan yahay dugsiyada dawladda.
- Waa inuu ardaygu ka soo gudbo heerka waxbarasha gundhigga (Primary), haddii uu rabo inuu ku biiro heerka dugsiyada sare.
- Waxay ukala beddelan karaan ardaydu dugsiyada kala duwan ama ha ahaadaan kuwo gaar ah ama kuwo dawladeed iyadoo la raacayo shuruudaha ay soo dejiso wasaaraddu.
- Inuu ardaygu buuxiyo shuruudahaas ka soo baxa go'aanada imtixaanaadka.
- Waxaa oggolaanayaa ardayda dugsi walba guddi ay magacawdo qaybta maamulka dugsiyada gaarka ka iyagoo la tashanaya maamulada dugsiyada.
- Ma banana oggolaanshaha arday la soo beddeley haddii uusan keenin shahaada fasalka uu ka soo gudbey oo lagu soo ansixiyey qaybaha qaabilsan ee wasaaradda.

17. Dhisida Golayaasha dugsiyada,Waalidiinta iyo barayaasha.

17.1: Godiyada heer Dugsi.

- Waxaa laga dhisayaa dugsi walba ee gaar ah guddi heer Dugsi..
- Xubnaha gudigu waxay ka kooban yihiin 10-15, waxana lagu darayaa wakiilo ka socda maamulka dugsiga, golaha waalidiinta iyo barayaasha, waxaana gudigaas ugu damaynta ansixinaya Wasiirka Wasaaradda.

17.2. Awoodaha gudiga :

- Waxaa xil ka saran yahay maaraynta guud ee dugsiyada gaarka ah dhinacyada maamulka iyo maaliyadda.
- Inay diyaariyaan qaababka ugu haboon ee lagu socodsiinayo waxbarashada.
- Qoondaynta kharashaadka dugsiga iyagoo la tashanaya golaha sare ee waxbarashada iyo dabagalkooda.
- Dib u eegidda gibir(fee),ka dhaafidda waxbarashada ardayda aan awoodin bixinta feega hubin ka dib.
- Soo jeedinta qorshayaasha maalgelinta iyo dhaqan gelinteeda haddii oggolaansho laga helo golaha sare ee waxbarashada iyadoo la raacayo xakameeyayaasha horay loo dejiyey.
- Kor ka eegidda miisaaniyadda dugsiga, ogolaansheheeda iyo ansixinta xisaabta dhammaystirka.

18 - Xeerarka Maaliyadda iyo Xisaabaadka.

- Maamulada dugsiyadu waxay dhowrayaan xisaabaha iyo diiwaanadooda sida ay dhigayso hannaanka lagu maamulo xisaabaadka guud ahaan.
- Sannad walba dhammaadkiisa waxaa dib loogu nakhtiimayaa xisaabaha u dambeeya ee dugsi walba iyo dhammaan hantida uu leeyahay dugsigu iyadoo la adeegsanayo xisaabiye hubsan oo madax bannaan (certified accountant).
- Waxay maamulada kala duwani u soo koryeelayaan qaybaha ku shaqada leh nuqul xisaabta lagu noqday muddo aan ka badnayn 3 bilood ka dib dhammaadka sannad Maaliyadeedka (fiscal year).
- Hannaanka gundhiga ee dugsiga gaarka ahi wuxuu u qoondeynayaa qayb ka mid ah dakhliga soo xerooda (income) horumarinta hawlaha barbaarinta ee dugsiga.

- Maamulka kharashka ee iskuulka gaarka waxaa lagu bixinayaa ugu yaraan sadex Saxiix oo ay kala yeelanayaan Maamulaha iskuulka, Xisaabiyaha iskuulka, iyo Guddoomiyaha Guddiga waalidiinta.

19. Xeerar Guud:-

19.1- Ma banaana ku daridda fasallo cusub oo aan horay ugu jirin warqadda oggolaansha haddii aan oggolaansho cusub laga helin dhinacyada ay khusayso oo horay ogolaanshaha u bixiyey.

19.2-Ma banana in laga raro dugsiga gaarka dhismihiisii hore iyadoo aan oggolaansho laga helin dhinacyada ay khusayso waxbarshada gaarka ah oo sharcigani tilmaamayo.

19.3-Waa in lagu qoraa magaca wasaaradda dhul alla iyo dhulkii dawladu ugu deeqdo dugsiyada gaarka ah.

19.4-Waxaa u banaan wasiirka waxbarshada Puntland inuu magacaabo gudiyo baaritaan oo gaar ah marka uu arko inay tahay lagama maarmaan.

20- Ganaaxyada.

22- Waxaa dugsi walba ee gaar ah oo ka leexda yoolalka barbaarinta ama jebiya qodob ka mid qodobada xeer hoosaadkan Mulkiilaha iyo maamulkiisuba mutaysanayaan ganaax lacageed iyo ciqaab xarig ah ,oggolaanshihiisa oo la tuuro ama la buriyo haddii :-

- Uu ka soo bixi waayo toosinta walxaha uu ku gaboodfalay ka dib marka la siiyo digniin qoraal ah.
- Haddii ay iska horyimaadaan socodka waxbaridda ee dugsiga iyo danta guud.
- Haddii loo adeegsado dhismayaasha dugsiga ujeeddooyin kale oo ka baxsan dhinaca waxbarashada.
- Haddii dugsigu si ula kac ah u jebiyo qodobada ama hanaanka ku qoran xeer hoosaadkan.
- Haddii ay caddaato in dugsiga gaarka ahi ay ka jiraan dhexdiisa qas dhinaca anshaxa wanaagsan aan waafaqsanayn ama isagoo u ololaynaya isku dhac iyo kala geyn dhinaca dadweynaha dhexdiisa ama

uu wax ka sheego diinta iyo waxyaalaha ummadu rumaysan tahay ama wax alla iyo waxay wasaaradu u aragto inuu halis ku yahay danta guud, waxaa lagu xirayaa dugsigaas go'aan ka soo baxa xafiiska wasiirka waxbarshada.

- Wasiirku wuxuu soo saarayaa go'aankaas markuu dhegaysto oo helo warbixinada iyo talooyinka arrinkaas khuseeya.
- Waxaa u banaan qaybta maamulka dugsiyada gaarka ah inay soo saaraan go'aan ku meel gaar ah oo lagu joojinayo dugsi walba oo gaar ah muddo ugu badnaan gaaraysa 2 todobaad ilaa laga hubsanayo, si loo qaato go'aanka u dambeeya.
- Isagoo raacsan qodobka sare , waxaa u banaan Golaha sare ee waxbarashada gaarka haddii ay u aragto inay lagama maarmaan tahay inay ku wareejiso dugsiga gaarka ah maamul ku meel gaar ah oo ka duwan kii dambiga galay.

21-la wareegida dugsiyada Gaarka ah.

- Dugsi gaar ah oo la buriyo oggolaanshihiisa waxaa lahaanshihiisa yeelanaya wasaaradda waxbarashada DGPL.
- Waxaa loo celinayaa hantiilaha dugsiga gaarka ah ee lala wareegay markii oggolaansha la buriyo magdhow u qalanta.

22-Racfaanada.

Go'aanada awooda waaxda waxbarshada gaarka ah waxaa dib looga doodi karaa muddo 2 todobaad gudohood ah iyadoo loo gudbinayo golaha sare ee waxbarashada iyo xafiiska wasiirka waxbarashada.

- Go'aanada golaha sare ee waxbarashada waxaa dib looga doodi karaa mudo bil gudaheed ah iyadoo la gaarsiinayo wasiirka waxbarshada Puntland.
- Wax dood ah lagama furi karo labada qodob oo hore haddii muddada la qoondeeyey ay dhaafto.
- Qaraarka wasiirka uu qaato ayaa ah midka ugu dambeeya oo dhaqan gelaya.

23-Xeerarka kala guurka

- Waxaa dugsiyada gaarka ahi waafajinayaan duruufahooda si waafaqsan xeer hoosaadkan mudo ku siman hal sano marka la saxiixo ka dib.Dugsigii muddo sanad gudihiis waafajin waaya habmaamulkiisa si waafaqsan xeerkan wuxuu mutaysanayaa ciqaabta uu xeerkani jidaynayo.

24-Awooda soo Saarista Xeerar Hoosaadyada iyo Hannaanada kala Duwan.

Waxaa u banaan golaha sare ee waxbarashada inuu soo saaro xeer hoosaadyo sii faahfaahinaya fulinta warqadda xeerka dugsiyada gaarka ah.

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa marka golayaasha dawladu ansixiyaan faafinta rasmiga ahna uu ku soo baxo.

Mr Ahmed Said Noor
Wasiirka waxbarashada iyo barbaarinta
Puntland-Somalia